

**Nolol wacan qof kasta**

Gargaarka ehelka



**Göteborgs  
Stad**



**Information om  
anhörigstöd  
på somaliska**

# **Ma jira qof kale oo aad adigu daryeesho/taagerto?**

**Anaga oo ah daryeelayaasha dadka ay ehelka  
yihiin caawiya, diyaar ayaanu kuu nahay!**

# Hadaad daryeesho ama caawiso qof ehelkaaga ah.

Ma jiraa qof qarabadaada ah oo yar, weyn, xanuun awgii, isticmaalka mukhadaradka, jidh ahaan ama maskax ahaan naafo u ah oo u baahan tageeraddada/daryeelkaga.

Qofka qarabadaada ah waxa uu noqon karaa qof famligaaga ka tirsan, qaraabo/xigto ama qof aad saxiib fiican tihiin. Adiga oo ah qofka qaraabada ah waxaad samaynaysa caawimo mihiima oo marmarka qarkood adiga ayaa u baahan kara daryeel.

Shaqadayadu waxa ay ku salaysan tahay sharciga arimaha bulshadda cutubkiisa 5, 10§:

*"...waxaan ku caawinaynaa tageero si aan ugu fududayno dadka daryeela/xananeeyo qof ay qaraabo yihiin oo mudo dheer xanuusanayay ama qof waayeela ama qof ay qaraabo yihiin oo naafo ah."*

Ka raadi  
"anhörigstöd/taageero  
qaraabo" bogagan hadii  
aad rabto inaad wax  
badan ka ogaato:

[goteborg.se](http://goteborg.se)  
[socialstyrelsen.se](http://socialstyrelsen.se)  
[anhoriga.se](http://anhoriga.se)  
[1177.se](http://1177.se)

# Miyaad rabtaa inaad cid kala hadasho xalaadaada?

Göteborgs stad/magaalada Göteborg waxa ka jira dad ka shaqeeya daryeelida dadka qarabadood tageeraya/caawinaya. Anaga waxaad nala soo xidhiidhi kartaa si aad u hesho warbixin, talo iyo tageero.

Taageerooyinka la siiyo dadka qaraabada ah waxa ka mida wadahadal, casharo/maxadaro, waxbarasho, kooxda taageerta dadka qarabadooda daryeela iyo caawimo in waxaad u baahan tahay aad hesho.

Adiga daryeelka bixinaya iyo qofka la daryeelayo waxay xaq u leeyihiin inay ka codsan karaan kaalmo tageero xafiiska adeega bulshada/caydha. Caawimadu waxay noqon kartaa in guriga aad ku hesho qof ku nasiya, meelaha dadka waayeelka ahi wakhti kusoo qaatan/dagverksamhet ama caawimo kale. Taageeradu waa mid qofka ku haboon oo si gaara loo siinayo. Hadii aad u baahan tahay turjubaan waa inaad noo sheegta si aanu kugu balamino.



# Kusoo dhawoow inaad la xidhiidho qof caawiya dadka daryeela qof ay qaraabo yihiin/anhörigkonsulent.

Warbixin dheeraada oo ku saabsan dadka qof qaarabo ah daryeela iyo noocyada kala duwan ee taageerada ayaad ka helaysaa anhörigkonsulent/qofka tageera dadka qarabadooda daryeela.

**Ma daryeesha/taageerta qof ka yar 65 jir iyo inaad rabto inaad la xidhiidho anhörigkonsulent/qof shaqadiisu tahay inuu caawiyo dadka ehelkooda tageera.**

**Telefoon:** 031-365 50 30

**E-mail:** [anhorigstod.under.65@funktionsstod.goteborg.se](mailto:anhorigstod.under.65@funktionsstod.goteborg.se)

**Ma daryeesha/taageertaa qof ka weyn 65 jir iyo inaad rabto inaad la xidhiidho anhörigkonsulent/qof shaqadiisu tahay inuu caawiyo dadka ehelkooda tageera.**

**Telefoon:** 031-365 00 00

Göteborgs Stads Kontaktcenter (Goobta lagala xidhiidho magaaladda Göteborg)

Waxaad waydiisa qofka caawiya dadka qarabadooda daryeela/anhörigkonsulent meesha adiga ama qofka aad qarabada tihiin dagan tihiin. Ka raadi [Stöd till anhöriga](#) ama iskaangare/sawir QR koodka, hoosta fiiri.



**Goobta la igala soo xidhiidhayo**

---

---

---